**Sharci lamba. 11 ee 8 Febarayo ee 1967**

**Sharciga la xiriira Ansixidda Heshiisa xal u helidda dacwooyinka ka dhasho maalgelinta dowladaha iyo muwaadiniinta dalalka kale**

**MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADDA**

Kadib markii la guddomay oggolanshaha Golaha Qaranka;

**Waxaa la soo saaray Sharcigaan**

**Qod. 1**

Ansixidda Heshiiska xal u helista muranka ka dhasha maal gelinta dowladda iyo muwaadininta dowladaha kel oo nuqul la soo lifaaqay halka, waxaa la amray Qod. 67 ee Dasutuurka. Qodobada 18 ilaa 24 waxay khuseeyan Heshiiskaani waxaana ay yeelan doonal awood sharci eek a dhaqan gali doono Jamhuuridda.

**Qod. 2**

Si loo hirgeliyo qod. 25 ee Heshiiska, oggolansha qoraalka ah in looga wareejiyo awooda garsooridaa dhinaca Dhexe waxaa la siin kara oo keliya kadib markii la dhegeystay aragtida Golaha Wasiirada.

**Qod. 3**

Go'aanka qasabka ah ee Maxkamadda Dhexdhexaadinta, si loo gaaro fulinta qodobada 53 ilaa 55 Heshiiska waxaa looga aqoonsada Jamhuuriyadda Somaliya awood fulineed oo u dhigmata xukun maxkamadeed ee rasmi ee Maxkamadda Sare.

**Qod. 4**

Sharcigaan wuxuu hirgeli doonaa maalinta ku xigta kadib markii lagu soo daabaco Faafinta Rasmiga, waxaana lagu keydin doona Faafinta Rasmiga ah ee Shuurucda iyo Dekrreetoyinka ee Jamhuriydda.

Waxaa la farayaa in cid kasto ay u hoggansanaho sharcigaan, cid kastana ay u hoggamiso.

Muqdisho, 8 Febaraayo 1967.

**Aden Abdulle Osman**

Rai'sul Wasaaraha
**Abdirizak Haji Hussein**

Wasiirka Arrimaha Dibedda
**Ahmed Yusuf Duale**

**HESHIISKA XALLINTA DACWOOYINKA LA XIRIIRA MALGELINTA U DHEXEYA DOWLAD IYO MUWAADININTA DOWLADAHA KALE**

---

## Hord Hac

### Dowladadaha Heshiiska lala galay

Iyadoo la tixgeliyey baahidda loo qabo wadashaqeynta caalamiga ee horumarinta dhaqaalaha iyo kaalinta ay malgashigu caalamigu uu leeyahay;

Iyadoo la tixgeliyey in ay dhalan karaan marmarka qaarkood murran khuseeya malgeelinta dowlladaha heshiiska lala galay iyo muwaadinin dowladadaasi;

Iyadoo la aqoonsan yahay in muraankaasi uu hoos tegi doono habka maxkamadeynta dalka ka jiro, waxaa loo baahan kara qaab xallin oo caalami ah;

Iyadoo tixgelin gaar la siin doono in ay jiraan hey'addo caalami ah oo dhex-dhexaadin ah oo dowladaha heshiiskaan qeyb ka ah iyo muwaadiniintu ay codsan karan in dacwooyinkoda ay qaadan;

Iyadoo rajo weyn laga muujiey in Bangiga Caalamiga ee dib-u-dhista iyo Horumarinta ay dhisto hey'adahasi;

Iyadoo la aqoonsado in oggolansho aamusan ee dhinacyada doonayo in u wareejiyaan dacwadooda hey'adaha dhex-dhexaadinta, oo noqon doono heshiis qasbaayo dhinacyadu in ay fuliyaan amaradda taalooyinka la faray oo ka soo arooray xukunka dhex-dhexaadista;

Iyadoo la caddeyey in dowladaha xubnaha ka ah Heshiiskaan kadib markii ay aqbaleen Heshiiskaan in aysan ku qasbaneyn in hoos geeyaan dacwad haddii.

## Cutubka 1aad

## Xarunta Caalamaiga ee Xallinta Dacwooyinka la Xiriirta Maalgelinta

### Qaybta 1aad

### Dhismaha Hey'adda

#### Qod. 1

1. Waxaa la dhisay Xarunta Caalamiga ee xallinta dacwooyinka la xiriira malgelinta (hadda kadib lagu magacaabi doono Xarunta);
2. Ujeeddada howlaha Xarunta waa la dhisaa fursadaha dhexdhexaadinta iyo xal u helinta dacwooyinka ka dhasha maalgelinta Dowladaha iyo muwadiniinta dowladaha kale iyadoo la dhowrid doono qaababka ku qoran Heshiiskan.

#### Qod. 2

Saldhigga Xarunta waxaa laga furay Xafiiska guud ee Bangiga Caalamiga ee Dib-u-habeynta iyo Horumarinta (hadda ka dib lagu magacaabi doono bangiga). Saldhiggu waxaa loo wareejin karan goob kale kadib markii go'aan ay ku gaarto Guddiga Maamulka oo lagu ansixiyo 2 dhig xubnaha Guddiga.

#### Qod. 3

Xarunta waxaa maamuli doono Guddiga Maamulka iyo hal Xoghayn oo xiriiri doono Guddiga Dhex-dhexaadinta iyo Guddiga Gar-qaadista.

**Qaybta 2aad**

Guddiga Maamulka

**Qod. 4**

1. Guddiga Maamulku wuxuu ka koobnaan doonaa wakiilada dowladah xubnaha ka ah. Waxaa wakiil cid ka maqan shirku uu meteli kara haddilaga soo qeyb gali Karin ama la ay fulin Karin howlahooda;
2. Haddii aysan jirin tilmaamo diidan, Guddomiyaha iyo ku-xigeenka Guddomiyaha Bangiga oo loo wakiisho in ay dowlad metelaan ayaa si xafiis ah wakiil ka noqon doona.

**Qod. 5**

Guddomiya Bangigu waxaa si toos u noqon doonaa Guddomiyaha Golaha Maamulka (hadda kadib loogu magacaabi doono Guddomiye), laakin ma laha awoodda coddeynta. Haddii uu ka maqan yahay shaqada amase uusan howlahiisa uusan gudan Karin waxaa meeteli doonaa cidda markaas cidda haysa jagada Agaasimaha ah.

**Qod. 6**

1. Iyadoo wax loo dhimeynin awoodaha iyo howlaha loogu xilsaaray qodobada kale ee Heshiiskaan, Guddiga Maamulku wuxuu yeelan doonaa;
   a) In uu soo saaro xeerarka maamulka iyo maaliyadda ee Xarunta;
   b) In uu soo saaro habka loo qaadi doono dhex-dhexaadinta iyo gar-qaadista;
   c) In la soo saaro xeerarka habka qaadista dhex-dhexaadinta iyo gar-qaadista, (hadda kadib loogu yeeri doono Xeerarka Dhex-Dhexaadinta iyo Xeerarka Gar-Qaadista);
   d) In uu aqbalo heshiisyada Bangiga si loo fuliyo adeegyada maamulka ee Bangiga;
   e) In uu xadiido marxalada adeegyada Hoghayaha Guud iyo Ku-xigeenka Xoghayaha Guud;
   f) In uu aqbalo warbixinta sanadlaha ee Xarunta.

   Go'aannada sare ku xusan xarfaha a), b), e) iyo f) waxaa lagu gaari doona 2 u dhig tirada ugu gu badan ee Guddiga Maamulka.
2. Guddiga Maamulku wuxuu magacaabi kara guddiyo hoosad haddi loo baahdo;
3. Guddiga Maamulku wuxuu fulin doona howl kasto oo loo baahdo si loo fuliyo howlaha lagu tilmaamay Heshiiskaan;

**Qod. 7**

1. Guddiga Maamulku wuxuu isugu imaan doonaa shir sanad leh ah iyo shir kasto oo Guddigu go'aamiyo ama Guddomiya, Hoghayaha Guud ama 5 xubnood ee tirsan Guddiga ay codsadaan;
2. Xubin kasto ee Guddigu waxay leeyihiin hal cod haddii aysan si kale loo dhigin, waxaana go'aanku lagu gaari doona tirada ugu badan;
3. Quorumka kasta ee shir kasta ee Guddiga Maamulka waxaa lagu gaari doono tirada ugu badan;
4. Guddiga Maamulka wuxuu go'aami kara si tiro dheeri ee 2 dhig xubnihiisa in la dhiso qaab siin doono Guddomiyaha awodda in uu codsado xubnaha codkooda iyadoo aanan la isugu yeerin shir. Cod bixintu waxay ansax noqon doonta oo keliya kadib markii la cod bixiyo muddada loogu tala galay.

**Qod. 8**

Xubnaha iyo Guddomiyaha Guddiga Maamulka ma heli doonan wax lacag ew howlaha ay hayaan.

**Qaybta 3aad**

Xoghaynta

**Qod. 9**

Xoghayntu waxaa ka kooban tahay Xoghayaha Guud, ha lama in ka badan ee Ku-Xigeenka Xoghayaha Gudd iyo shaqaalaha.

**Qod. 10**

1. Xoghayaha Guud iyo Ku-xigeenadiisa waxaa loo dooran doona Guddiga Maamulka 2 dhig seddax tirada xubnahaha, Muddo xiloodka jagadoodu waa ilaa iyo 6 sano waana loo soo dooran doona mar kale. Kadib markii uu la tashto Golaha Maamulku, Guddomiyaha wuxuu soo jeedi mushaaraxiinta jagoouinka loo doonaya jagooyinkaasi;
2. Xilaalka loo doortay waxay noqonayaan kuwa khilaafsan jago kasto ee la xiriirta siyaasadda. Xoghayaha Guud iyo Ku-xigeenadiisa ma qaban karaan jago kale haddii aysan marka hore helin oggolaanshaha aan Guddomiyaha;
3. Haddii Xoghayaha Guud uu maqan yahay amase uusan gudan Karin howlahiisa, Ku-xigeenkiisa ayaa meteli doona. Haddii ay jiraan Xoghayaha Guud oo hal ka badan Golaha Maamulka ayaa caddeyn doona hadka ay u kala horreyaan.

**Qod. 11**

Xoghayaha Guud ayaa si sharci ah wakiil uga yahay Xarunta wuxuuna mas'uul ka yahay maamulka iyo shaqaalaha iyadoo loo hoggansan yahay amarrada Heshiiskan iyo xeerarka Guddiga Maamulka. Wuxuu yelaanaya xilka rasmiga ee qore – oo si sharci u ansixiyo – xukumada dhex-dhexaadinga iyo gar-qaadista oo la soo saaro iyadoo loo hoggansan yahay Heshiiskaan nuqullada uu ansixiyey in sli yihiin.

**Qaybta 4aad**

**Guddiyada Hoosaadyaadka – The Panels**

**Qod. 12**

Guddiyada Hoosaadka ee Dhex-dhexaadinta iyo Guddiyada Hoosaadka ee Gar-Qaadista waxay ka koobnaan doona shaqsiyaada leh aqoon oo lagu saleeyey Xeerka la qortay.

**Qod. 13**

1. Dowlad kasto ee ka mid ah Heshiiskaan waxay uu dirsan karan Guddi Hoosaadkaan 4 qofood oo xatta aanan ahay muwadiniintooda;
2. Guddomiyaha wuxuu magaaabi kara 10 qofood Guddi Hoosad. Shaqsiyaadkaasi sidaas loo magacaabay waxay noqon doonaan kuwa u dhashay dalal kale duwan.

**Qod. 14**

1. Shaqsiyaadka loo doortay in ay qaabtanjagooyinka Guddiyadaana waa in ay yihiin kuwa leh aqoon dhinaca sharciga, ganacsiga, warshadaha ama maaliyadda si loogu aamino howlaha in ay gaaraan xukun madax banana.

Waxaa muhimad iska leh aqoonta sharciga markii la dhisaayo Guddi Hoosada Gar-Qaadista;

2. Guddomiyuhu markii uu magacaabaya shaqsiyaadka loogu tala galay Guddiyadaan waa in uu tixgeliyaa muhimadda in la dhowro mabaa'diida iyo shuruucda caalamiga ee arrimaha dhaqaalaha.

**Qod. 15**

1. Xubnaha Guddi Hoosadku waxay hay doonan xilkood ilaa 6 sano oo dib loo cusboneysiin karo;
2. Haddi uu xubin geeriyodo ama is casilo, waxaa dib loogu noqonayaa ciddi soo magacawday in mar kale ay soo dirto xubintaasi;
3. Xubnaha Guddiyada waxaay wadi doonaan howlahooda ilaa intii uu qof kale kala wareegi doono.

**Qod. 16**

1. Hal qof ayaa si wadar u gudan karto howlaha labada Guddi Hoosad;
2. Haddii magacaabidda hal xubin ay ka timaado hal ama in ka badan ee Dowlad ka tirsan Heshiiskaan, ama Guddomiyuhu uu doorto jagadaasi, waxaa la qaadan doonaa ciddii ugu horreysay ee soo magacawday, ha ahaato xatta Dowladda oo uu muwaadin ka yahay;
3. Magaacabista shaqsiyaadka waa in la soo gaarsiiya Xoghayaha Guud waxayna howshaasi bilaaban doonta wargelintaas ka dib.

**Qaybta 5aad**

**Marxalaada, Xasanadaha iyo Faa'idooyinka**

**Qod. 18**

Xaruntu waxay leedahay shaqsi qeynuuni ah ee caalami ah. Waxaana ka mid ah awoodaheeda:

a) In uu heshiis geli karo;
b) In uu iibsan karo kana qeybin karo hantida guurtada ah iyo tan ma guurtada ah;
c) In uu bilaabi karo dacwoyin sharci ah.

**Qod. 19**

Si oo uu hirgeliyo howlaha loo igmaday, Xaruntu waxay yeelan doonta xasanaad iyo faa'idooyinka lagu tilmaamay Qeybtaan.

**Qod. 20**

Hantida Xaruntu waxay yeelanaysa xasanaadka in aan wax dacwo lagu furin haddii aysan Xaruntu laftigeedu aysan xasanaadkaasi aysan ka noqonin.

**Qod. 21**

Guddomiyaha, xubnaha Guddiga Maamulka, shaqsiyaadka uu xil saaran Dhex-dhexaadinta ama Gar-Qaadista oo ka mid ah Guddiga ku tilmaaman faqradda 3 ee qodobka 52 iyo saraakiisha iyo shaqaalaha Xoghaynta waxay yeelan doona:

a) In wax dacwa lagu furin Karin ee la xiriirta gudashada howlahooda haddii aysan Xaruntu iska diidin xasanaadkan;
b) Haddii aysan ahayn muwadin Dalka ay joogaan waxaa loo sahli doonaa shuruudaha dal ku galka iyo diiwan gelinta ajaanibka, howlaha shaqada

qaranka, xadiidda safaradda waxaana ay heli doonaa faa'idooyinka loogu tala galay wakiiladha, saraakiisha iyo shaqaalaha Dowladaha kale ee ka mid ah Heshiiskaan.

**Qod. 22**

Amarrada ku qoran qod. 21 waxaa loola jeeda shaqsiyaadka ka soo qeyb qaata fadhiyada Heshiisya iyagoo ah wakiil, qareen, hirgeliye, marqaati ama khabiir, laakin sida ku qoran faqradda b) waxaa xasanaadyadasi loo oggol yahay oo keliya markii safar ay ku joogan goobta shirkaasi ka dhacayaa.

**Qod. 23**

1. Xafiiska Keydka Xarunta waa mid aan lagu xadgudbin Karin meel kasto ka yalaanee;
2. Is gaarsiinta rasmiga ah ee Xarunta waxay la mid ahaan doonta kuwa loo ogolaaday hey'adah caalamia.

**Qod. 24**

1. Xarunta, hantideeda, daqligeeda iyo fulinta howlaha loogu oggoladay Heshiiskaan waxaa ka reeban wax allaliyo wixii canshuur iyo qiidmada kastamka. Sidoo kale Xaruuntu waxaa la reebay mas'uuliyadda soo qaadista ama bixinta canshuur oo idil;
2. Markii laga reebo in muwadin uu ka mid yahay shaqaalaha, canshuur kuma waajibto gunnoyinka la siiyo Guddomiyaha Xarunta, xubnaha Guddiga Maamulka ama mushaarka, gunnoyinka iyo kharajka ay Xaruntu siiso saraakiisheeda ama shaqalaha Xoghaynta;
3. Canshuur kuma waajibeyso gunno sharafeedka ama gunnoyinkala siiyo shaqsiyaadka gudanaaya howlaha dhex-dhexaadiye ama gar-qaade ee Guddigu uu dhibay jagadaasi iyadoo loo hoggansan yahay faqradda 3) ee qodobka 52 oo xeerinaya goobaha shirku ka dhacaayo haddii Xaruntu ay aka duwan tahay goobta howlahaasi laga fulin doono.

**Cutubka 2aad**

Awooda Sharciga ee Xarunta

**Qod. 25**

1. Awooda sharciga ee Xarunta waxay gaarsisan tahay xad gudub kasto ee sharci oo ka dhasha maal gelin dowladda ka mid ah Heshiiska iyo muwaadin Dowladda kale, kuwaas oo u soo qora Xarunta in la dhex galo. Kadib markii la helo aqbalidda laba dhinac cidna kama noqon karo iyadoo dhinaca kale ka helin aqbalid;
2. Muwaadin dowlad kale waxaa loola jeeda:
   a) Shaqsi kasta oo haysta dhalashada Dowlad ka duwan Dowladda dacwada laga yahay, markii dacwada la furaayey oo heshiis ku galay in arrintaan lagu dhameeyo si dhex-dhexaad ama gar-qaadis ah, dacwadaasi oo la diwaan geliyey sida ku carifan faqradda 3 ee qodobka 28 iyo faqradda 3 ee qodobka 36;
   b) Ciddii haysata shaqsiyad qaynuuni ah ee haysta dhalashada mid ka mid Dowlaha Heshiiska oo ka duwan Dowladda ay dacwada ka timid muddadi ay dacwada ku heshiiyeen in loo wareejiyo qaabka dhex-dhexaadinta ama gar-qaadka, iyo ciddi shaqsiyad qaynuun ah eel eh dhalashada Dowlad ka mid ah

Heshiiska laakin ay kula heshiisaya in dowlad kale loo saaro dhalashay sida uu oggol yahay Heshiiskaan.

3. Waxaa loo baahan yahay oggolanshaha qeynuuniga ee qeyb ka mid ahma hey'ad ka tirsan Dowladda Heshiiska gashay haddii aysan isla Dowladdaasi aysan soo gaarsiinin mowqiifkeda Xarunta in oggolansho aan loo baahneyn;
4. Dowlad kasto markii ay oggolaneyso, ama ansixin doonto Heshiiskaan waxay ka baran degi doonta shuruudaha iyo qeybaha dacwooyinka loo baahan yahay amase loo baahneyn in la hoos keeno awooda sharciyeed ee Hesiiskaan. Xoghayaha Guud waxaa uu soo gudbin doona wargelintaas Dowladaha xubnaha ka ah oo idil. Wargelin looma qaadan karo in ay tahay oggolaansho sida lagu carifay faqradda 1).

**Qod. 26**

Oggolanshada dhinacyada in ay galan qaabka dhex-dhexaadinta sida ku qoran Heshiiskaan waxaa noqonaya haddii si kale loo dhigin, oggolanso in la hoos tago gar-qaadis. Dowladaha ka mid ah Heshiiskaan waxay ka hor intii aysan bixinin oggolaanshahooda ay codsan karan in ay maran kulli marxaladaha sharciga idaariga eek a jira dalka ka hor intii aanan la bilaabin dhe-dhexaadinta.

**Qod. 27**

1. Waxaa reeban in Dowlada ka mid Heshiiskaani ay isticmaasho awoodeeda dibloomasiga ah ama ay sharci caalamiga cuskato si ay u difaaco muwaadinkeeda oo oggoladay in dhex-dhexaad lagu dhameeyo haddii aysan Dowladda lala dacwoonayey anay fulin xukunka laga soo saaray dhex-dhexaadintaasi;
2. Difaaca diblomasiga sida ku qoran faqradda sare ee 1) waxaa ka reeban in loo isticmaalo u sahalka socodsiinta dacwada.

**Cutubka 3aad**

Heshisiinta

**Qaybta 1aad**

Codsiga Heshisiinta

**Qod. 28**

1. Markii Dowlad ka mid ah Heshiiskaan, ama muwaadin ka tirsan Dowladaasi uu go'aansado in uu ka qeyb qaato heshiis, wuxuu codsi qoraal ah ee arrintaas khuseeyso u soo qori doona Xoghayaha Guud, kaas oo u soo diri doono nuqul dhinaca kale ee dacwada;
2. Codsiga waa in lagu qoraa nuxurka dacwada, tilmaamaha dhinacyada, amarka oggolanshaha dhex-dhexaadinta iyo gar-qaadista;
3. Xoghayaha Guud wuxuu diwan gelin doonaa codsigaan haddii ay waafaqsan tahay shuruudada sida awood sharciyeed ee Xarunta. Kadibna wuxuu ogeysin doonaa dhinacyada in la diwan geliyey ama la diiday diwaan gelintaasi.

**Qaybta 2aad**

Dhismaha Guddiga

**Qod. 29**

1. Guddi Hoosad Dhex-dhexaadinta (inta wixii ka dambeeya lagu magacaabi doono Guddiga) waxaa la dhisi doonaa kadib markii la diiwan geliyo codsiga sida ku qoran Qod. 28:

a) Guddigu wuxuu ka koobanaan doona hal dhex-dhexaadiye iyo tiro aan isla eeken oo dhex-dhexaadiyeyaal oo ay si wadajir ah u soo magacaaben laba dhinac oo is haysta;
b) Haddii laba dhinac ay ku heshiin waayan tirada dhex-dhexaadiyaalka ah ama qaabka loo magacaabi doono, Guddiga wuxuu ka koobnaan doona 3 dhex-dhexaadiyeyaal, 2 oo ay dhinacyadu magacaabteen midka seddaxaad oo noqon doono Guddomiye oo laba dhinac si wada jir ay u magacaabteen.

**Qod. 30**

Haddii Guddigu uusan magacaabin 90 beri gudahooda maalintii la soo gaarsiyey wargelinta Xoghyaha Guud in la diiwan geliey codska sida ku cad faqradda 3) ee qodobka 28, ama muddadii laba dhinac ay ku heshiiyey, Guddomiyaha Guddiga Maamulka, codsi dhinac isagoo la tashtay dhinacyada wuxuu magacaabi doona dhex-dhexaadiyeyaal.

**Qod. 31**

1. Iyadoo la dhowraayo qod. 30 Dhex-dhexaadiyeyaalka waxaa laga soo dooran karaan kuwa ka baxsan Guddiga Dhex-dhexaadiska;
2. Dhex-dhexaadiyaalka Guddiga ka kor laga soo magacaabay waa in yeeshan shuruudaha lagu carifay faqradda 2) ee qodobka 14.

**Qaybta 3aad**

Fadhiyada Dhex-Dhexaadinta

**Qod. 32**

1. Guddiga wuxuu leeyahay awood go'aamin;
2. Diidmo ka timaada dhinacyada dacwada isku haysta oo ku saabsan arrimo aysan awood sharci u lahayn Guddigu, waxaa la tixgelin doona in uu Guddigu arrintaasi la go'aamin kara si hor dhac ama lagu dari doono nuxurka dacwada.

**Qod. 33**

Arrin kasta oo lagu geli doono si dhex-dhexaadin ah waxaa la isticmaali doona amarrada qeybtaan ku tixan, haddii aysan dhinacyadu si kale u heshiin oo la xiriira amarradda dhexdhexaadinta oo ay labada dhinac ku heshiiyaan.Haddii ay soo baxdo arrimo ka bahsan amarradda aan ku tilmaaman qeybtaa ama amarrada Dhexdhexadinta ama heshiis labada dhinaca waxaa go'aan ka gaari doono Guddiga.

**Qod. 34**

1. Waxaa wajib ku ah Guddiga in ay isusoo dhaweeyso labada dhinac si loo gaaro go'aan la aqabli karo. Sidaas awgeed, Guddigu intii ay dacwadu socoto, waxaa laga rabaa in uu talooyin u soo jeediyo labada dhinaca si xal loo gaaro. Dhinacyada waa si niya sami ah ula shaqeeyaan Guddiga si loo higeliyo howlaha Guddiga waxaayna qiimo weyn siin doonaan talooyinka la soo jeediyey;
2. Markii ay dhinacyadu gaaran heshiis, Guddigu wuxuu qori doonaa warbixin oo ku tilmaami doono natijada. Haddii ay Guddigu u caddato in la gaari Karin waxa heshiis ah, Guddigu wuxuu qori doona warbixin oo lagu caddeyn doono asbaabaha loo gaari la'yahay heshiis. Haddii dhinac ka mid ah dacwada uu ka soo qeyb gali waayo shirarka Guddigu wuxuu qori doonaa warbixin in dhinaaci uusan ka soo qeyb glin shirarka.

**Qod. 35**

Haddii aysan laba dhinac ay heshiis ku gaarin si wadar, labada dhinac kama qeyb qaadan karaan hab-heshiis kale oo Maxkamad ama goob kale lagu qaadi doono ama codsan karo talooyin, fursado xal oo la gaaray muddadii ay socotay dacwada.

**Cutubka 4aad**
Gar-Qaadista

**Qaybta 1aad**
Codsi Gar-Qaadista

**Qod. 36**

1. Dowlad ka mid ah Heshiiskaan ama muwaadin Dowlad ka tirsan Heshiiska oo doonayo in uu ka qeyb galo marxaladda Gar-qaadista, waxaa in codsi qoraa u soo qoraa Xoghyaha Guud oo nuqul codsiga u diri doono dhinaca kale;
2. Codsiga waa in lagu qora arrimaha la xiriira dacwada oo idil, tilmaamaha dhinacyada, oggolanshaha in ay doonayaan qar-qaadista iyadoo la raaci doono habka loogu tala galay dhe-dhexaadinta iyo gar-qaadista;
3. Xoghayaha Guud wuxuu diwaan gelin doona codsiga kadib markii laga reebo dacwada uu Guddigu uusan u lahayn awoodda sharciga ah in ay ku qaado Xarunta. Waxaa la ogeysin doonaa dhinacyada in la diiwan geliyey dacwada.

**Qaybta 2aad**
Dhisamaha Maxkamadda

**Qod. 37**

1. Maxkamada Gar-Qaadista (hadda kadib lagu magacaabi doono Maxkamadda) waxaa la dhisi doonaa kadib markii diwaan gelinta codsiga gar-qaadistu la diiwan geliyo,
2.
   a) Maxkamadda waxay ka koobnaan doona 1 Gar-qaade ama tiro isdhaaf ah ee gar-qaadayaal ah oo ay dhinacyadu magacaabaan;
   b) Haddii dhinacyadu ay si wadajir ah u gaari wayaan heshis ku saabsan tirada gar-qaadayaalk ama habka loo qaadi doono dacwada, Maxkamaddu waxay ka koobnaan doonta 3 gar-qaadayal, 2 oo ay dhinacyadu soo magacaabteen, midka seddaxaadna waxaa si wadajir ah u Guddomiyaha Maxkamaddu magacaabi doono.

**Qod. 38**

Haddii Guddigu uusan magacaabin 90 beri gudahooda maalintii la soo gaarsiyey wargelinta Xoghyaha Guud in la diiwan geliyo codsika sida ku cad faqradda 3) ee qodobka 36, ama muddadii laba dhinac ay ku heshiiyey, Guddomiyaha Guddiga Maamulka, codsi dhinac isagoo la tashtay dhinacyada dacwadacwuxuu magacaabi doona gar-qaadiyaal. Kuwaas oo Guddimiyaha sida ku cad qodobkaan ma noqon karaan muwaadiniinta Dowladda Heshiiska ka tirsan oo dhinac ka ah dacwada ama muwaadin Dowlad oo dacwadda dhinacka ah.

**Qod. 39**

Tiraada gar-qaadista waxaa noqon doonaan muwaadinin Dowladaha ka duwan Dowladda dacwada ku irta iyo Dowlad ka tirsan oo muwaadinkiisu dhinacka yahay dacwada, laakin marxaladdan laguma dabaqi karo amarrada qodobkaan haddii

gaar-qaadka oo keligiis ama xubnaha Maxkamadda si gaar ah loogu magacaabahay si wadajir ah labada dhinac.

**Qod. 40**

1. Iyadoo la dhowraayo qod. 38 Gar-qaadiyaalka waxaa laga soo dooran karaan kuwa ka baxsan Guddiga Gar-qaadista, markii laga reebo magacaabidda Guddomiyaha;
2. Gar-qaadiyaalka Guddiga oo laga soo magacaabay ka baxan Guddiga Gar-qaadista waa in laga helaa shuruudaha lagu carifay faqradda 1) ee qodobka 14.

**Qaybta 3aad**

Awoodaha iyo Howlaga Maxkamadda

**Qod. 41**

1. Guddiga wuxuu leeyahay awood go'aamin;
2. Diidmo ka timaada dhinacyada dacwada isku haysta oo ku saabsan arrimo aysan awood sharci u lahayn Guddigu, waxaa la tixgelin doona in uu Guddigu arrintaasi la go'aamin kara si hor dhac ama lagu dari doono nuxurka dacwada.

**Qod. 42**

1. Maxkamaddu waxay go'aamin doonta dacwada iyadoo u hoggansanaan doonta shuruucda ay ku heshiiyeen laba dhinac. Haddii labada dhinac ay ku heshiin wayaan, Maxkamadda waxay dabaqi doona sharciga Dowladda ka tirsan Heshiisan oo dhinac ka ah dowladda (iyadoo ay ka mid yihiin shuruucda is khilaafka sharciga) shuruucda caalamiga ah ee khuseeya dacwada;
2. Maxkamadda soo ma saari karto xukun ah "non liquet" haddii amuus ay dhacdo ama sharcigu uu mugdi ku jiro.
3. Qodobbada faqradaha 1) iyo 2) waa kuwo aan waxba ka jirin, Xaqiiqda ah in Maxkamaddu ay go'aan ka gaari karto muran "ex aequo et bono" haddi ay dhinacyadu ku heshiiyaan.

**Qod. 43**

Kadib markii laga reebo heshiisyada dhinac, Maxkamaddu waxay waqti kasto ee ay dooda dacwada socota waxaa loo bahan doonaa:

a) In dhinac yahay ay hor keenan wixii qoraal ah ama wixii muujin kara;
b) In la tago goobaha dacwada khuseeya si loo baaro haddii loo baahdo.

**Qod. 44**

Arrin kasta oo lagu geli doono marxaladda gar-qaadista ah waxaa la isticmaali doona amarrada qeybtaan ku tixan, haddii aysan dhinacyadu si kale u heshiin oo la xiriira amarradda gar-qaadista oo ay labada dhinac ku heshiiyaan.Haddii ay soo baxdo arrimo ka bahsan amarradda aan ku tilmaaman qeybtaa ama amarrada Gar-qaadista ama heshiis kale oo labada dhinaca ku kooban waxaa go'aan ka gaari doono Maxkamadda.

**Qod. 45**

1. Haddii uu dhinac ka mid ah kuwa dacwada uusan soo xaadirin, micnaheedu ma ahaan in la qirtay wixii dhinaca kale uu ku andacooday;
2. Haddii uu dhinac ka mid ah uu ka baqdo shirarka dacwada, dhinaca kale waxay codsan karta Maxkamadda in ay go'aan ka gaarto. Maxkamaddu waxay la xiriiri

doonta dhinaca maqnaaday iyadoo fursad uu sineysa in uu ka soo qeyb galo go'aamidda ka hor.

**Qod. 46**

Haddii aan si kale loo dhigin, Maxkamaddu,haddii hal dhinac codsado dhameeystiri kara arrimaha dadban ama dheeraadka ah, iyo kuwa sida tooska uga dhasha waxyaalaha dacwada ku jira, taasoo lagu xiray in ay hoos tegi doonaa heshiiska wadareed iyo in Xaruntu ay u leedahay awoodda sharciga.

**Qod. 47**

Haddii heshiiska laba dhinac ay si kale u dhigin, Maxkamaddu haddii loo baahdo, waxaa soo jeedin karta in tilaaboyin ku meel gaar ah laga qaado si loo adkeep bad qabka xuquuqa labada dhinac.

**Qaybta 4aad**

Xukunka

**Qod. 48**

1. Maxkamaddu waxay ku go'aamin doontan tiro hal dheeri ee xubnaheeda;
2. Xukunka Maxkamadda waa in ay ahaato mid qoraal ah oo xubnihii Maxkamaddu ay saxiixeen;
3. Xukunku waa in uu khuseeya su'aal kasto oo loo soo jeediey Maxkamadda;
4. Cid kasta oo xubin ka ah Xukunka la gaaray waa in uu caddeya asbabta xukunka, ha ahaado aragti la mid kuwa oggolay ama ka soo horjeeday xukunka
5. Xaruntulama faafin karo haddii aysan oggolansho dhinacyada laga helo.

**Qod. 49**

1. Xoghayaha Guud wuxuu u diri doona dhinacyada go'aanka Maxkamadda oo la suggay kadib markii ay Maxkamaddu go'aan ka gaarto;
2. Maxkamaddu, kadib markii codsi ugaga yimaado dhinacyada, muddo 45 beri gudahooda oo xukunku ka soo baxay Maxkamadda, waxaa dib ugu laaban karta xukunka si loo saxo wixii qalad ah ee guurista, xisaabta ee ku jira xukunkaasi. Muddada loo qabta ee faqradda 2 ee qod. 51 iyo faqradda 2 ee qod. 52 waxay ka bilaaban doona taarikhda go'aanka la soo saaray.

**Qaybta 5aad**

Tarjumidda, dib-u-eegidda iyo Burrinta Xukunka

**Qod. 50**

1. Haddii ay jiraan muran micnaha ama dulucda xukunka, dhinac kasto waxa codsi qoraal ah u soo diri karta Xoghayaha Guud si loo helo tarjumid qancisa;
2. Codsigasi waxaa loo soo gudbin doona Maxkamadda soo saartay xukunkaasi. Haddii taasi surto gal ahan waxaa la dhisi doonaa Maxkamad sida ku cad Qeybta 2aad ee Cutubkaan. Maxkamadda, haddii loo baahdo waxaa la hakin karaa ilaa iyo intii go'aan laga gaari doono.

**Qod. 51**

1. Labada dhinac waxay weydisan karan iyadoo loo qoori doono Xoghayaha Guud in dib-loogu noqdo xukunka haddii la oggaado arrimo saameyn weyn ku yeelan karo go'aanka haddii Maxkamaddu ama dhinacyadu ay ogaayeen, taas oo aysan ahayn mid dayac ku yimid;

2. Codsigaasi waa in la soo weydiista ilaa 90 beri kadib markii la ogaaday arrimahaasi, ee guud ahaan ilaa yo 3 sano kadib markii xukun la soo saaray;
3. Codsiga waxaa loo soo diri doona Maxkamadda soo saartay xukunka. Haddii taasi surto gal ahayn, Maxkamadda cusub ayaa la dhisi doona iyadoo la raaci doono amarradda ku qoran Qeybta 2 ee Cutubkaan;
4. Maxkamadda haddii marxaladuhu oggolaadan wuxuu awood u leeyahay in uu hakiyo fulint xukunka ilaa iyo intii go'aan ka gaaridoono. Haddii dhinac codsado in la hakiyo fulinta xukunka, taasi waa la hakin doonaa si ku meel gaar ilaa iyo intii Maxkamaddu ay go'aan ka gaari doono.

**Qod. 52**

1. Dhinacayada waxaay codsan karan burrinta xukunka iyadoo codsi u soo qori doono Xoghyaha Guud iyagoo tilmaami doono arrimaha hoos ku qoran:
   a) In Maxkamaddu si qalad ah loo dhisay;
   b) In Maxkamaddu ka gudubtay xadkeeda iyo awoodeeda;
   c) In xubin ka tirsan uu ahaa mid musuq-maasuq ah;
   d) In lagu tuntay amarrada habka socodsiinta dacwada;
   e) Xukunka asbaab la'aan la qoray.
2. Codsiga burrinta waa in 120 beri gudahooda maalintii la soo saaray uu soo gaara. Haddii asbabta burrintaay laxiriirto musuq-maasuq, muddado waa 120 beri maalintii la ogaaday marxaladaasi, iyo ilaa 3 sano maalintii xukunka la soo saaray.;
3. Kadib markii codsigaasi helo, Guddomiyay wuxuu si ku meel gaar ah u magacaabi doona Guddiga Gar-qaadista oo 3 qofood ka kooban. Waxaa ka reeban in xubin horay uga tirsaneyd Guddigi go'aanka la isku heysto ka tirsan in uu ka mid noqdo Guddiga soo sartay xukunka, ama in ay isku dhalasho noqdaan xubnahaasi, ama muwaadin Dowlad daccwada dhinac ka ah, ama horay loogu magacaabay xubin Guddiga Gar-Qadista ee labada dhinac, ama isku dayey in heshiis kagaaro arrinta la isku haysto. Guddigu wuxuu awood u leeyahay in uu buriyo xukunka ama qeyb ka mid haddii laga helo marxaladaha ku tixan faqradda 1);
4. Amarradaha qodobada 41, 45, 48, 49, 53, iyo 54 ee Cutubyada 6aad iyo 7aad waxaa lagu dabaqi doonaa "mutatis mutandis" dacwooyinka la hor geeyo Guddiga;
5. Guddigu wuxuu awood u leeyahay haddii marxaladuhu oggoladaan in la hakin fulinta xukunka ilaa iyo go' aan laga soo saari doono. Hakiinta xukunka oo dhinac soo codsaday waxaa la joojin doona fulintiisa ilaa iyo intii Gudigu uu baaritan ku sameeyo go'aan uu ka gaaro;
6. Haddii xukunka la buriyo, dacwada waxaa loo gudbin doona Maxkamad cusub oo lagu dhisay iyagoo loo hoggansan yahay Qaybta 2 ee isla Cutubkaan.

**Qaybta 6aad**

Aqoonsiga iyo Xukunka

**Qod. 53**

1. Xukunku waa mid rasmi ah oo xadiidaya dhinacyada, lagama qaadan karao rafcaan ama dacwo ka duwan inta ku qoran Heshiiskaan. Haddii xukunka la hakinin iyadoo loo hoggansan yahay amarradda Heshiiska waa in la fulieyaa;
2. Micnaha "xukun" waxaa loola jeeda go'aan laga gaari in la tarjumo, dib-u-eegid lagu suubiyo ama la burin karo sida ku qoran qodobadda 50, 51 iyo 52.

## Qod. 54

1. Dowladda kasta oo ka mid ah Heshiiskaan waa in ay u aqoonsatad xukunka lagu soo saaray Heshiiskaan waana in ay u hoggamisaa wajiibaadka lacageed ee xukunka guud ahaan dhulkeed si la mid ah xukun kama dambeys ah ee Maxkamadahood. Haddii Dowladdu tahay mid federal ah, dowladdu waa in ay ka dhigtaa xukunka mid la mid ah xukun rasmi ah ee laga soo saaray maxkamada Federalka ah;
2. Ciddii doneysa in la aqoonsado ama in lagu fuliyo xukunka dhulka Dowlada ka tirsan Heshiiskaan waxaa laga rabaa in uu maxkamadda ama hey'ad kale ee Dowladda horgeeyo nuqul rasmi ee Xoghayaha Guud soo saxiixay. Dowlad kasto waa in ay ogeysiisi u dirtay Xoghayaha Guud, maxkamadda u xil saaran howlahaasi iyo wax kasta oo isbedel eek u yimaado.

## Qod. 55

Qayb ka mid qod. 54 looma qaadan karo in uu xannibaayo sharciga ka jira Dal kasto oo ka mid ah Heshiisa ee khuseeyo fulin la'aanta xukun dowlad ama dowladda ajanibi ah.

## Cutubka 5aad

Isku Beddelid iyo ka Joojin Dhex-Dhexaadiyeyaal iyo Gar-qaadayaal

## Qod. 56

1. Ka dib markii la dhiso Guddi ama Maxkamada, dacwada ay bilaabata, qaab-dhismahooda lama beddeli karo. Laakin, haddii dhex-dhexaadiye ama gar-qaade uu geeriyoodo ama howlahiisa qaban waayo ama ruqseysto, jagadiisa waxaa sida ku cad amarrada Qeybta 2aad ee Cutubka 3aad amad Qeybta 2 ee Cutub 4aad;
2. Xubin ka tirsan Guddiga ama Maxkamadda wuxuu wadi doonaa howlahisa xatta haddii ay dhamaato in uu xubinimadu Guddiga ay dhammato;
3. Haddii dhde-dhexaadiye ama gar-qqade la magacaabay oo ruqseysto isagoo haysanin aqabalidda Guddiga ama Maxkamadda oo uu xubin ka ahay, Guddomiuhu wuxuu magacaabi doona cid kale ee ka tirsan Guddiga si loo buxiyo jagadaasi.

## Qod. 57

Dhinac kasto wuxuu u soo jeedin kara Guddiga ama Maxkamadda in laga bixiyo xubin kasto kadib markii ay cadato in shuruudahaay ka maqan yihin sida ku qoran faqradda 1 ee qodobka 14. Waxaa kale ee lagu bixin karaa gar-qaade haddii aanan loo dooran Karin Maxkamadda sida ku cad Qeybta 2 ee Cutubka 4aad.

## Qod. 58

Go'aaminta in la bixiyo dhex-dhexaade ama gar-qaade waxaa gaari doono xubnaha kale ee Guddiga ama Maxkamadda , haddii go'aanku noqdo mid siman ama haddii loo baahan yahay in tiro badan oo dhex-dhexaadiyaal ama gar-qaadayal la bixyo,waxaa go'aankaasi qaadan doono Guddomiyaha. Haddii so jeedinta ay tahay mid suggan, go'anka waxaa lagu saleyn doona sida ku qoran Qeybta 2 Cutubka 3aad ama Qaybta 2 ee Cutubka 4aad.

**Cutubka 6aad**
Qiimaha Dacwada

**Qod. 59**

Kharaj dhinacyada ku waajibay si ay u isticmaalaan adeegyada Xarunta waxaa carifi doono XoghayahaGuud isago dhowraya amarradda Guddiga Maamulka.

**Qod. 60**

1. Guddi iyo Maxkamad kasta waxaa qayixi doonta kharajkooda iyo waxaa ku baxay xubnahooda sida loogu qorsheyey Guddiga Maamulka kadib markii lala tashtay Xoghayaha Guud;
2. Amarrada faqradda 1) ee qodobkaan ma ka reebayo dhinacyada fursada in la heshiyaan Guddiga iyo Maxkamadda dhinaca kharajka iyo xoolaha ku baxa xubnahooda.

**Qod. 61**

1. Wixii kharaj ah eek u baxa marxaladaha dhex-dhexaadinta iyo kharaj xubnaha Guddiga iyo adeega Xarunta waxaa si siman u qeybsan doono labada dhinac;
2. Maxkamadda Gar-qaadista, haddii aysan si kale labada dhinac ku heshiinin, waxay qiimeyn doonta kharaj ku baxay dacawada iyadoo carifi doonto haka bixinta lacagtaasi. Go'aankaasi wuxuu a mid ahaan doonaa xukunka.

**Cutubka 7aad**
Goobta Dacwada

**Qod. 62**

Qaadista dacwooyinka dhex-dhexaadinta, iyo kuwa gar-qaadista waxaa lagu qaadi doona Xarunta haddi si kale lagu heshiinin.

**Qod. 63**

Qaadista dacwooyinka dhex-dhexaadinta ama gar-qaadista waxaa lagu qaadi kara haddii dhinacyadu heshiis ku yihiin:

a) Xarunta Maxkamada Gar-Qaadista Joogtada ah- Permanent Court of Arbitration- amag goob kale, ha ahaato mid gaar loo leeyahay ama mid guud oo Xaruntu ay heshiis la geli karto;
b) Goob kasto oo Guddigu ama Maxkamaddu ay aqbashay iyadoo lala tashtay Xoghayaha Guud.

**Cutubka 8aad**
Isku Dhaca Dowladaha ka Tirsan Heshiiskaan

**Qod. 64**

Isku dhaca ka dhex dhaco Dowladaha ka tirsan heshiiskaan ee la xiriira micneynta ama dabaqidda Heshiiskaan oo aanan lagu dhameynin dhex-dhexadin waxaa loo gudbin doono Maxkamadda Caalamiga ee Garsoorka- "International Court of Justice" - iyadoo codsi loo soo diri doono.

**Cutubka 9aad**

**Qod. 65**

Dowlad kasta oo ka mid ah Heshiiskaan waxay soo jeedin karan wax ka bedellid Heshiisa. Wixii wax ka beddelid waa in la soo gaarsiiya Xoghaya Guud ugu

yaraan 90 beri ka hor intii shirka Golaha Maamulka waxaana loo gudbin doona xubnaha Golaha Maamulka.

**Qod. 66**

1. Haddii Guddiga Maamulku uu aqbalo wax ka bedelid ugu yaraan 2 dhig xubnihiisa, waxaa go'aankaasi loo diri doona xubnaha Dowladaha ka tirsan si loo ansixiyo lana aqbalo. Is bedel kasto wuxuu hirgeli doono 30 beri kadib markii la keydiyey ogeysiinta Dowladaha Heshiiskaan in dowladuhu ay aqbaleen wax ka bedelidda;
2. Wax ka bedeliddu ma khuseyn doonto xuquuqda iyo waajibaadka ku oran Heshiiskaan ee hal dowlad ka tirsan Heshiiskaan ama hey'adihiisa ama shaqsi muwadiin ah ee dowladaasi oo ay ka soo aroortay aqbalida.

**Cutubka 10aad**

Amarradda Gunaanadka ah

**Qod. 67**

Heshiiskaan wuxuu u furan yahay Dowladaha xubnaha ka ah Bangiga. Waxaa loo furay in ay saxiixaan dowladaha kale eek a tirsan Sharciga Maxkamadda Caalamiga ee Garsoorka oo Guddiga Maamulku, iyadoo u codeysa 2 u dhig seddax xubnood u dirtay in ay saxiixdo.

**Qod. 68**

1. Heshiiskan wuxuu ku suggan yahay in la ansixiyo, la aqbalo iyadoo loo hoggansami doono qaab dhismeedka Dasturiga aha ee Dowlad kasta;
2. Heshiiskaan wuxuu hirgeli doona 30 beri kadib markii keydinta qoraalka oo ansixiyey, la aqbalay. Dowladaha markaas kadib aqbali doona ama ansixi doono waxay hirgeli doonaa 30 beri kadib muddada la soo qeyb galay.

**Qod. 69**

Dowlad kast eek a tirsan Heshiiska waxay ku dhaqaaqi doonta amarro sharci ee loo baahdo si loogaga hirgeliyo amarrada Heshiiska.

**Qod. 70**

Heshiiskaan wuxuu ka hirgeli doonaa goob kasta ee xiriir caalami ee Dowladda ka tirsan Heshiiska ay mas'uul ka tahay, markii laga reebo goobaha ay si qoraal dowladdasi ay uga reebay muddadii Dowladdasi ay saxiixeysa ama ansixisay.

**Qod. 71**

Dowlad kasto oo ka tirsan Dowladdan waxay ka bixi karta Heshiiska iyado qoraal u soo diri doonto keydka Heshiiskaan. Ka bixiddu waxay hirgeli doonta 6 bilood kadib markii wargelintaasi la helay.

**Qod. 72**

Ogeysiis Dowlad ka tirsan Heshiiskaan sida ku cad qod. 70 iyo 71 ma sameeyn doono xuquuqda iyo wajiibaadka ku qoran Heshiiskaa ee Dowlad ama hey'ad ama shaqsi muwaadin u ah kadib markii la helay oggolaanshaha sharci ee Xarunta .

**Qod. 73**

Qorallada ansixidda, aqbalidda ee Heshiiskaan iyowax ka beddelidda waa in lagu keydiyaa Bangiga oo ah keydka Heshiiskaan. Keyd hayaha wuxuu u gudbin doona nuqullo asal ee Heshiiskaan Dowladaha xubnaha ka ah Bangiga iyo dowlad kasto oo saxiixday Heshiiskaan.

**Qod. 74**

Keyd haya waxaa uu diwaan gelinaya Heshiiskaan Xoghayanta Qaramadda Midoobay sida ku cad qod. 102 ee Axdiga Qaramada Madoobay iyo Amarrada loo istimaalah Golaha Guud.

**Qod. 75**

Keyd hayuu waa in ogeysiiya dowladaha saxiixay:

a) Saxiixyada sida ku xusan qod. 76;
b) Keydinta qorallada ansixinta, aqbalida sida ku cad qod. 73;
c) Taarikhda Heshiiskan uu hirgeli doono sida ku cad qod. 68;
d) Arrimaha ka reeban dhulalka qaarkod sida ku cad qod. 70;
e) Taarikhda uu wax ka bedelka Heshiiskaan uu hirgeli doono sida ku cad qod. 66;
f) Ka bixidda sida ku qoran qod. 71.